

5-TA D EE LAGU DEJIYO XAALADDA

EE LOOGU TALOGALAY BIXIYAYAASHA DARYEELKA ILMAHA

1 Toos ah u Wajah (Direct) - Si Degdeg ah Ula Hadal

- Wax ka qabo habdhaqanka laakiin keliya haddii ay ammaan tahay in sidaas la sameeyo.
- Hadalladaada ha ahaadaan kuwo gaagaaban, deggan, oo adag:
 - "Fadlan jooji." / "Waa inaad ka baxdaa goobta."
- Isku day inaad is dejiso. Ha murmin, codkaaga kor ha u qaadin, ama ha la jaanqaadin codka qofka gardarrada sameeyay.

2 Cid Wakiilo (Delegate) - Hel Caawinaad

- Wac bixiye kale, deris ku caawiya, ama waalid lagu kalsoon yahay si aad u hesho taageero degdeg ah.
- Weydii qof weyn oo kale: "ma wici kartaa caawinaad?" / "Ma eegi kartaa carruurta inta aan arrintan wax ka qabanayo?"

Haddii qof diido inuu baxo, uu gardarro sameeyo, ama uu si hanjabaad ah u dhaqmo, la xirii 911.

3 Sug (Delay) – Dib ka hubi

- Weydii qofka ay dhibaataadu soo gaadhay (bixiye, carruur, waalid, ama booqde):
 - weydii: "ma fiican tahay?"
 - u soo bandhig inaad la joogtid ama aad ka caawiso soo sheegista dhacdada.
- Taageeradu waxay muhiim tahay xitaa kadib markay arrintu dhacdo.

4 Dhexgal (Distract) - Jooji dhibaataaynta

Dhexgalku waxay ballaarin kartaa xiisadda waxayna qalqal gelin kartaa go'aanka.

- Adeegso isgaarsiin deggan iyo ka-qaybgal aan iska hor imaad lahayn:
- weydii su'aal aan waxyeello lahayn, ama u jeedi fiiro gaar ah mowduuc kale.
 - "fadlan dhinac u dhaqaaq; carruurta way socdaan."

5 Diiwaangeli (Document) - Si Ammaan ah u Diiwaangeli

- Haddii ay suurto gal tahay, weydii dadka waaweyn ee ku caawinaya inay kaa caawiyaan diiwaangelinta dhacdooyinka.
 - si furan u duub: wejiyada, faahfaahinta, goobta
- Waligaa ha soo dhigin muuqaallo adigoo qofka ogolaansho ka haysan.
- U isticmaal macluumaadkan ujeedooyin warbixin.